**Sida Racfaan looga qaato Go'aanka Barnaamijka Nafaqada Dheeraadka ah ee Dumarka, Dhallaanka iyo Carruurta (Special Supplemental Nutrition Program for Women, Infants, and Children, WIC)**

## Xuquuqaha Racfaanka iyo Xogta Guud

Haddii barnaamijka WIC uusan diiwaangelin adiga/cunugaaga ama kaa saaro adiga/cunugaaga barnaamijka aadna dareemeyso in go'aanku ahaa mid aan caddaalad ahayn, waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato. Waxaad haysataa 60 maalmood oo laga bilaabaayo maalinta lagula socodsiiyay ogeysiiska si aad u codsato dhageysi caddaalad ah. Haddii 60 maalmood ka badan laga joogo, ma codsan kartidd dhageysi. Waxaad codsigaaga sameyn kartaa adoon ka cabsan dhibaateyn ama ganaaxyo. Xogta dhageysiga caddaaladda ah waxaa laga heli karaa dhammaan goobaha WIC iyo **webseedka Waaxda Caafimaadka ee Vermont**: https://www.healthvermont.gov/family/wic/usda-nondiscrimination-statement#wicappeals

Haddii laguu diiday dheefaha WIC sababo la xariira xadgudubka ka qaybgalka go'aankana lagugu ogeysiiyay warqad, codsiga aad ku codsaneyso Dhageysi Caddaalad ah waa in la sameeyo lixdan (60) maalmood gudahood oo laga bilaabaayo taariikhda go'aanka soo baxay, ama go'aanka ogeysiiska warqad lagugu ogeysiiyay.

Dhageysiyada Caddaalada ah waxaa qabta Guddiga Adeegyada Dadwaynaha (Human Services Board, HSB) ee Hay'ada Adeegyada Dadwaynaha ee Vermont. Waxaad Dhageysiga caddaaladda ah u codsan kartaa si toos ah, taleefoon, ama boosto ama iimayl adoo u diraya hay'ada deegaanka ama Gobalka. Adeegyada turjumaada ayaa la bixin doonaa, waxaana xogta racfaanka lagu codsan karaa luuqado kale sida (Af Albanian, Carabi, Burmese, Dari, Faransiis, Kirundi, Af-Neebaali, Pashto, Shiineeska Fudud, Soomaali, Isbaanish, Sawaaxili, Luuqadda Dhaqanka shiineeska, Af-Fiitnaamiis).

## Sida loo Codsado Dhageysi

Codsiyada dhageysiga ee la xariira Dhageysiga Caddaalada ah iyo/ama shirarka Xafiiska Deegaanka waxaa lagu codsan karaa qaab toos ah, taleefoon, boosto ama iimayl si loogu guddbiyo Xafiiska Gobalka ee WIC, Guddiga Adeegyada Dadwaynaha ama xafiiska deegaanka ee WIC. Dhameystir **Foomka Racfaanka** mar walba ood codsaneyso Dhageysi Caddaaald ah iyo/ama Shirka Xafiiska Deegaanka. Foomka racfaanka waxaa lagu heli karaa qaab warqado ah ama elektaroonig ah. Marka aad codsigaaga qaab toos ah u gudbiso, waxaa lagu siin doonaa nuqul warqad ah. Haddii aad u baahan tahay caawimaad ku aadan buuxinta foomka waxaad codsan kartaa caawimaaad waxaadna shaqaalaha waydiisan kartaa inay iskaan gareeyaan oo ay iimayl ahaan ugu diraan foomka WIC@Vermont.gov (iimaylka Xafiiska WIC ee Gobalka) iyo Guddiga Adeegyada Dadwaynaha (HSB) oo ah contact.hsb@vermont.gov.

Haddii aad buuxiso foomka racfaanka ee elektarooniga ah, waa inaad nuqul ku kaydsataa kumbuyuutarkaaga iyo aad ku dirto midkood iimaylka ciwaanka kore, ama boostada Agaasimaha WIC ee Gobalka:

Agaasimaha Gobalka ee WIC
Barnaamijka WIC ee Vermont
280 State Drive

Waterbury, VT  05671-8360

## Waa maxay Dhageysi Caddaalad ah?

Inta lagu jiro **Dhageysi Caddaalad ah**, waxaad waydiin kartaa su'aalo waxaadna erayadaada kuu gaarka ah ku sharixi kartaa sababta aad u dareemeyso in go'aanku qaldan yahay ama uusan caddaalad ahayn. Waxaad dooran kartaa inaad adigu wakiil iska noqoto, ama waxaad dooran kartaa inuu qof kale wakiil kaa noqdo, sida qof qaraabo ah, saaxiib, masuul sharci, ama qof kuu hadla.

Sidoo kale waxaad dalban kartaa shir Lagu qabto Xafiiska Deegaanka. Waxaad shirkada Xafiiska Deegaanka ka codsan kartaa waqti kasta, oo ay kujirto isla waqtiga aad codsato Dhageysi Caddaalad ah**.** Shirka Dhageysi Caddaalad ah ma'ahan mid qasab ah. Shirka Dhageysi Caddaalad ah waa kulan u dhaxeeya adiga, kormeeraha xafiiska deegaaanka, agaasimaha WIC ee Gobalka ama wakiil. Waxaad dooran kartaa inaadd keensato qof ku matala, sida qof qaraabo ah, saaxiib, masuul sharci, ama qof kuu hadla, oo ka qaybgala Shirkada Xafiiska Deegaanka. Shirka Xafiiska Deegaanka waxaa la qaban doonaa 10 maalmood gudahood oo ah malmaha shaqada kadib marka aad codsigaaga usoo dirto xafiiska deegaanka ee WIC ama kulan qab fiidyow lo qabanaayo. Shirka Xafiiska Deegaanka wuxuu kuu oggolaanayaa inaad xalliso caqabadaha kahor inta uusan dhicin Dhageysiga caddaalada ama aan la dhameyn. Haddii aadan dooneyn Shirarka Xafiiska Deegaanka, ama aadan ku qancin natiijada kasoo baxda Shirka Xafiiska Deegaanka, waxaad codsan kartaa Dhageysi Caddaalad ah.

**Codsigaaga Dhageysiga Caddaalada ah ayaa la diidi karaa haddii:**

1) Aadan soo gudbin codsigaaga Dhageysiga Caddaalada ah muddo lixdan (60) maalmood gudahood ah;
2) Adiga, ama wakiilkaaga, codsiga Dhageysiga Caddaalada oga noqdo qab qoraal ah;
3) Adiga ama wakiilkaaga ku guuldareysto, idinkoo bixin sabab macquul ah, inaad kasoo hormuuqataan Dhageysiga Caddaalada ah; ama
4) Horey laguugu diiday inaad ka qaybgasho Dhageysiga Caddaalada ah aadana bixin karin caddeyn muujinaysa xaaladaadu keeneysa in adiga ama cunugaaga u qalantaan ay isbadeshay keeni kartana inaad heshaan Dhageysi Caddaalad ah oo kale.

**Ogeysiiska Natiijada Racfaanka**

HSB waa inay qoraal kugu ogeysiisaa go'aanka 45 maalmood gudahood kadib marka aad u sheegto WIC inaad dooneyso dhageysi caddaalad ah. Haddii HSB go'aamiso inay tahay inaad hesho dheefahaga, dheefuhu waa inay isla markiiba kuu billoowdaan. Waxaad heli doontaa fursad aad racfaan oga qaadato go'aankaan aadna ugu gudbiso Maxkamada Sare ee Vermont.

**Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah ama aad qabto su'aalo, waxaad wici kartaa lambarka xafiiska WIC ta Gobalka Vermont 1-800-649-4357 ama Guddiga Adeegyada Dadwaynaha oo lambarkoodu yahay 802-828-2536.**

## Foomka Racfaanka Barnaamijka Nafaqada Dheeraad ah ee Dumarka, Dhallaanka, iyo Carruurta (Special Supplemental Nutrition Program for Women, Infants, and Children, WIC)

### Barnaamijka WIC ee Waaxda Caafimaadka Vermont

Fadlan buuxi foomkaan si aad u codsato Shirka Xafiiska Deegaanka, Dhageysiga caddaalada ah, ama labadaba.

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah ama aad qabto su'aalo, waxaad wici kartaa lambarka xafiiska WIC ta Gobalka Vermont 1-800-649-4357 ama Guddiga Adeegyada Dadwaynaha oo lambarkoodu yahay 802-828-2536.

1. Waxaan codsanayaa kan soo socda, sida lagu xusay xeerarka Barnaamijka WIC:

   ☐ **Shirka Xafiiska Deegaanka Lagu qabanaayo**

   ☐ **Dhageysi Caddaaald ah**

   ☐ **Labadaba**

2. Fadlan sharax, adiga oo adeegsanaya erayadaada, sababta aad u dareemeyso in go'aanka lagu diiday dheefaha WIC ay u qaldan yihiin ama aysan caddaalad u ahayn marka laga eego heerarka u qalmida WIC.

3. Magaca Buuxa
(Magaca Koowaad, Xarafka koowaad
ee Magaca dhexe, magaca Saddexaad) ______________________________

4. Ciwaanka Boostada: ______________________________

5. Iimaylka: ______________________________

6. Lambarka Taleefoonka: ______________________________

7. Haddii aad codsanayso dhageysi caddaalad ah adiga oo matalaya carruurta qoyskaaga ee loo diiday dheefaha WIC, fadlan hoos ku qor magacyadooda oo buuxa iyo taariikhaha ay dhasheen.

Magaca Buuxa: ______________________ Taariikhda Dhalashada: ______________

Magaca Buuxa: ______________________ Taariikhda Dhalashada: ______________

Magaca Buuxa: ______________________ Taariikhda Dhalashada: ______________

Magaca Buuxa: ______________________ Taariikhda Dhalashada: ______________

7. Haddii aad jeclaan lahayd inaad soo ka xeysato wakiil kaala qaybgala dhageysiga, fadlan qor magaciisa, ciwaankiisa, iimaylkiisa iyo/ama lambarka taleefoonkiisa.

Magaca: ______________________________

Ciwaanka: ______________________________

Iimaylka: ______________________________

Taleefoonka: ______________________________

8. Ma jeclaan lahayd in turjumaan ama qof luuqada kuu turjuma uu kaala qaybgalo dhageysiga? ☐ Haa ☐ Maya

7. Haddii jawaabtu haa tahay, luuqadee u baahan tahay: ______________________________

8. Taariikhda la Dhameeyay: ______________________________

Buuxi foomka, seyf garee oo boostada ugu dir Agaasimaha WIC:

Agaasimaha Gobalka ee WIC
Barnaamijka WIC ee Vermont
280 State Drive
Waterbury, VT 05671-8360

Ama, waad seyf gareen kartaa waxaadna iimayl ugu diri kartaa WIC@Vermont.gov (iimaylka Xafiiska WIC ee Gobalka) iyo/ama Guddiga Adeegyada Dadwaynaha ee contact.hsb@vermont.gov.

Hay'addani waa loo-shaqeeye fursaddiisa loo siman yahay.

**Dhammaan barnaamijyada kale ee kaalmada nafaqada ee FNS, hay'adaha gobalka ama deegaanka, iyo hay'adaha la hawlgala, waa inay soo dhajiyaan Bayaanka Takoor La'aanta ee soo socda:**

Sida waafaqsan sharciga xuquuqaha madaniga ah ee federaalka iyo sharciyada iyo qaynuunada xuquuqaha madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA), hay'adan waxaa ka mamnuuc ah takoorida ku salysan isirka, midabka, asalka qaran, jinsiga, (oo ay ku jiraan, aqoonsiga jinsiga iyo nooca jinsiga), naafonimada, da'da, ama aargoosiga ama aargudashada hawlo hore oo xuquuqaha madaniga ah.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado aan ahayn Ingiriisiga. Shaqsiyaadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, Hab qoraaleedka camoolaha, daabicidda farta waaweyn, cajalada maqalka, Luuqadda Dhagoolka ee Maraykanka), waa inay kala xidhiidhaan Hay'adda Gobalka ama deegaanka ee mas'uulka ka ah maamulka barnaamijka ama xarunta TARGET ee USDA lambarka (202) 720-2600 (cod iyo TTY) ama waa inay la xidhiidhaan USDA iyaga oo u maraya Federal Relay Service (Adeegga Dadka Dhagaha la' ee Federaalka) ee lambarka (800) 877-8339.

Si loo gudbiyo dacwada takoorka ee barnaamijka, Dacwad-qabaha waa inuu buuxiyo Foomka AD-3027, Foomka Dacwada Takoorka Barnaamijka ee USDA kaas oo onleen ahaan looga heli karo barta: https://www.fns.usda.gov/sites/default/files/resource-files/ad3027-somali.pdf, xafiis kasta oo USDA ay leedahay , iyada oo la wacayo (866) 632-9992, ama la qorayo warqad ku socota USDA. Warqadda waa inay leedahay magaca, ciwaanka, lambarka taleefanka ee dacwad-qabaha, iyo sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan falka takoorka ah ee la soo eedeeyay oo faahfaahsan si loogu wargaliyo Kaaliyaha Xoghayaha ee Xuquuqaha Madaniga (ASCR) nooca iyo taariikhda xadgudubka xuquuqda madaniga ah ee la soo eedeeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqadda waa in loogu diraa USDA;

**(1)** **boostada:**
U.S. Department of Agriculture
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410; ama

**(2)** **fakiska:**
(833) 256-1665 ama (202) 690-7442; ama

**(3)** **iimaylka:**
program.intake@usda.gov

Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay.